

Dhammaan dadka Norway imanayaan waa inay tijaabo iska qaadan markay yimaadaan

Dawladdu waxa ay xuduudaha ku soo rogtay shuruudo tijaabo-qaadis oo intii hore ka dag, si loo hakiyo loona yareeyo faafidda nooc-fayruuseedka cusub ee omikoroon. Laga bilaabo saqda dhexe Jimce 3-da Desember, waa in dhammaan dadka Norway soo gelaya ay caadi ahaan tijaabo iska qaadaan iyadoo aanay ku xidhnayn in ay tallaalan yihiin iyo in kale.

- Xaalad aan sahlaynayn ayaa ka taagan Norway. Waa lagama maarnaan in la soo rogo tallaaboojin intii hore ka adag si loo hakiyo nooc-fayruuseedka omikoroon. Sababta tallaabadan loo qaadayo ayaa ah in xaaladda la xakameeyo, in la helo aqoon dheeraad ah oo ku saabsan noocan cusub ee fayruska iyo si looga hortago in culays xad-dhaaf ah ku yimaado goobaha caafimaadka, ayay tidhi wasiirka caafimaadka iyo daryeelka, Ingvild Kjerkol.

Dawladdu waxa kale oo ay rabtaa in ay dib u dhigto in nooca omikoroon noqdo nooca ugu badan waddanka, ilaa inta la tallaalayo in kale oo ka mid ah dadka gaboobay iyo dadka nugul.

Si waafaqsan talooyinka laga helay Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha waxa wax-ka-beddel lagu samaynayaa xeernidaamiyaha covid-19 si ay dhammaan dadka imanaya Norway waajib ugu noqoto inay tijaabo iska qaadaan. Meelaha ay xarun tijaabo-qaadis ku taallo halka waddanka laga soo gelayo waa in tijaaba lagu qaado halkaas, ama waa in lagu qaado meesha dawladdu go'aamiso in tijaabada lagu qaado. Mararka aan xarun tijaabo-qaadis ku oollin meesha waddanka laga soo gelayo, waa in tijaabada la iska qaado 24 saacadood gudahood marka waddanka la yimi ka dib. Qofka socdaalka ahi wuxu mararkan oo kale dooran karaa in uu tijaabada degdegga ah iskaga qaado goob tijaabo-qaadis oo dawladeed ama in uu iska

qaado tijaabada degdegga ah ee qofku iskii iska qaado. Haddii tijaabada degdega ah ay sheegto in qofku qabo cudurka, haddii lagu qaaday xarun ama haddii qofku iskii iska qaaday ba, waxa xeer-nidaamiyuhu waajib ka dhigayaa in tijaabo PCR ah la iska qaado sida ugu dhakhsaha badan ugu dambayna 24 saacadood gudahood. Shardigani wuu khuseeyaa xataa dadka si buuxda u tallaalan ama covid-19 ku dhacay. Dadka wadanka imanaya ee ka weyn 12 sanno waa in ay wataan af-dabool marka ay joogaan goobo dadka ka dhixeyya oo aan la kala fogaan karin, ilaa inta ay iska qaadayaan tijaabo cudurka laga waayey.

Intas marka laga tago, waxa dadka socdaalka ah laga qaadi karaa tijaabooyin ku salaysan inta halistu le'eg tahay (marka laga reebo dadka si gaar ah looga dhaafay).

Waxa sii jiraya in shardiga ah in tijaabo la iska qaado marka Norway la yimaado laga dhaafo dadka ay ka mid yihiin dadka waddan kale ka soo shaqo taga, shaqaalaha diyaaradaha iyo darawallada shaqada ku jira.

Waxa dib loo soo celinaya shardiga ku saabsan in la iska qaaday tijaabo cudurka laga waayey ka hor intaan la gelin Svalbard. Haddii fayrusku xoog uga dillaaco Svalbard, waxa maadaama shaqaalaha caafimaadku kooban yahay iman karta in culays ku yimaado adeegyada bulshada oo dadkana loo soo qaado berriga, taas oo iyaduna culays saari doontaa heegaanka ambalaaska hawada. Arrintan darteed dadka Svalbard ayaa mudnaanta la siinayaan marka la bixinayo irbadda xoojinta ah ee tallaalka koroonaha.

Xeer-nidaamiyuhu waxa uu dhaqangalayaa 2-da Desember saacadda 24:00. Tallaabooyinka la adkeeyay dib u-qiiimayn ayaa lagu samayn doonaa labo toddobaad ka dib.